

2023 - 2024



BIXINTA LACAGTA KULEEJKA

Hagaha Gargaar Dhaqaale

Sideen u bixiyaa kharashka kuleejka?

Haddii aad u maleneyeyso inaadan awoodin inaad aado kuleej, mar kale ka fikir! Kaalmada dhaqaale waxay ka caawisay malaayiin arday ah inay iska bixiyaan waxbarashadooda kadib dugsiga sare. Dhab ahaantii, qiyaastii \$120 bilyan ayaa la bixiyaa sanad walba oo ah deeqo, waxbarasho shaqo, iyo lacag deyn ah si loo caawiyo in ka badan 13 milyan oo arday ah inay sii wataan kuleej ama dugsi xirfad.

Agabkaan waxaa loogu talagalay inuu kaa caawiyo inaad billoowdo inaad ka fikirto sidii aad u bixin lahayd kharashka kuleejka iyo sida gargaarka maaliyadeed uu kuugu shaqeeyo. Waqtii ku bixi dib u eegista buug yarahaan si aad u barato aasaaska kaalmada maaliyadeed iyo sida ay kaaga caawin karto inaad dabooshoo kharashyada waxbarashada kuleejyadaada.

Sii wad akhriska si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan gargaarka maaliyadeed, FAFSA, iyo MN Dream Act!

Noocyada Gargaarka Dhaqaale

Fahamka kaalmada dhaqaale waxay ka bilaabataa fahamka fursadahaaga iyo waxyabaha aad heli karto.

Gargaarka dhaqaaluhu wuxuu ku yimaadaa foomam badan:



DEEQQAHA

Lacagaha laga bixiyo dawlada dhexe iyo dawlad goboleedyada iyadoo lagu salaynaayo baahida iyo xaq u yeelashada. Deequhu waa abaalmarin aanad u baahnayn inaad dib u bixiso;



DEEQQAHA WAXBARASHADA

Lacagta lagu bixiyo iyadoo lagu salaynaayo baahida dhaqaale, mudnaanta tacliimeed, ama duruufo iyo awoodo kale oo gaar ah. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah kaalmada daryeelka ilmaha; faa'iidooyinka ciidamada; Kaalmada mudnaanta ee buundooyinka wanaagsan iyo guusha tacliinta; ama deeqo waxbarasho oo ku salaysan isirka, qowmiyada; hibo gaar ah, duruufaha nololeed;



WAXBARASHADA XIRFADAH

Lacagta laga helo shaqada gudaha iyo banaanka kaambaaska waxay kuu oggolaysaa inay kaa caawiso lacagta xaadirista kuleejka;



AMAAHYADA

Lacagta aad ka amahato dawladda dhexe ama dawlad goboleedka ama hay'adaha gaarka ah oo ay tahay in lagu bixiyo dulsaar.



BOOQO MYHIGHERED

si aad u hesho ilo dheeraad ah oo ku saabsan bixinta Lacagta Kuleejka!



Si dhaw u firi

Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardayga ee Federaalka (FAFSA)

WAA MAXAY FAFSA IYO SIDA LOO CODSADO

Si aad u hesho gargaarka maaliyada ee federaalka iyo gobolka, waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayga ee Federalka (FAFSA). Tan waxa loo isticmaalaa in lagu go'aamiyo baahidaada dhaqaale, taas oo ah faraqa u dhxeeyaa wadarta kharashka imaanshaha iyo waxa adiga iyo qoyskaaga aad awood u leediihiin inaad ku biirisaan waxbarashadaada.

Si aad u go'aamiso arrintaan, foomka waxa uu kaa doonayaa inaad soo gudbiso macluumaadka la xariira dakhliga iyo hantida qoyskaaga, iyo xaaladaada arday ka ahaan. Codsigaaga FAFSA-gaaga oo dhammaystiran waxaa laga heli doonaa dhammaan dugsiyada aad dooratay.

Marka la go'aamiyo baahidaada waxaad heli doontaa "xidhmo ah kaalmo dhaqaale" ood ka helayso kuleejyada aad codsatay si aad u eegto.

Xidhmadaan waxay ka kooban tahay deeqaha Federal Pell, Deeqda Gobolka Minnesota iyo gargaar kasta oo maaliyadeed oo ay bixiyaan kuleejyada iyo jaamacadaha aad xaq u leedahay in aad hesho. Sidoo kale kaalmadaada dhaqaale waxaa lagu kordhin doonaa amaah iyo maalgelinada waxbarashada xirfada.

CODSASHADA KAALMO

Waxaa jira shan tallaabo oo aasaasi ah oo lagu codsado kaalmada dhaqaale:

- 1** Codsashada iska qorista hal ama in ka badan oo kuleej.
- 2** Ka codso kaalmo dhaqaale www.fafsa.gov adoo isticmaalaya codsiga bilaashka ee Kaalmada Ardayga ee Federaalka (FAFSA) diseembar 2023. Ardayda aan sharchiyeysnayn iyo DACAmented waa inay isticmaalaan codsiga kaalmada maaliyadeed ee gobolka (MN Dream Act) ee laga heli karo www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct halkii ay ka isticmaali lahaayeen FAFSA.
Fadlan ogsoonooow: Isbadellada cusub ee la hirgeliyey awgeed, nooca cusub ee FAFSA waxa uu furmi doonaa Diisambar, halkii uu ka furmi lahaa taariikhda caadiga ah ee Oktoobar 1 deeda. Eeg bogga 5 aad si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.
- 3** Codso deeq waxbarasho iyo deeqaha uu bixiyo gobolka, kuleejyada, iyo ilo kale. Codso codsiyada ama ka raadi oonleenka. Ka eeg deeqaha waxbarashada bartaan sida www.fastweb.com si aad u baarto deeqaha waxbarashada gaarka ah.
- 4** Hel warqadaha diiwaangelinta kuleejka (waqtiyada waa ay kaladuwan yihiin).
- 5** Ka hel waraaqo kuleejyada oo qeexaya u-qalmitaankaaga gargaarka maaliyadeed (badanaa Maarsa 1 ama kadib, iyadoo ku xiran marka aad gudbisay FAFSA ama Codsiiga Xeerka Riyada MN), oo uga jawaab si waafaqsan.

Maxaan u baahanahay inaan soo gudbiyo?

Si aad u hubiso in habka codsigaagu u socdo sida ugu dhakhsaha badan ee ugu fudud ee suurtagalka ah, waxaad u baahan doontaa inaad gacanta ku haysato diiwaanada maaliyadeed ee soo socda markaad codsanayso:

- Dib u celinada canshuurta (haddii la buuxiyay sanadka ka horeeya, dib u celinada canshuurta 2022 ee 2024-2025 FAFSA);
- Lambarkaaga Amniga bulshada
- Foomamka W-2 Forms ee sanadkii hore
- Bayanka Baanka ee hadda
- Diiwaanada dakhliga aan la canshuurin ee sanadkii hore
- Diiwaanada ganacsiga hadda iyo beerta
- Haddii aad tahay arday aan dhaqaale ahaan madax banaanayn, canshuur celintaada waalidka, iyo dhammaan kuwa kore
- Haddii aad guursatay (xaaskaaguna buuxisay canshuur celin gaar ah), keen canshuur celinta xaaskaaga, iyo dhammaan kuwa kore ku xusan.

AALADA DIB U HELIDA XOGTA SI AY U NOQOTO BADELKA XOGTA TOOSKA AH EE KAALMADA DHAQAALE

Laga soo cusboonaysiyyay Aalada Soo Celinta Xogta, Kaalmada Maaliyadeed ee Tooska ah Xog Beddelka aaya si toos ah uga wareejin doona ka qaybqaatayaasha macluumaadka canshuurta federaalka foomka FAFSA ee IRS. Dhammaan ka qaybqaatayaasha waa inay bixiyaan oggolaansho si ay u oggolaadaan xog isweydaarsigaan. Eeg bigga xigta si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

SEYF GAREE DIIWAANADAADA

Xasuusnoow inaad Kaydiso diiwaanada aad adeegsato si aad u diyaariso FAFSA-gaaga haddii ay dhacdo inaad u baahato inaad xaqiijiso saxnaanta ama haddii aad leedahay cillad tignoolajiyadeed.

WARBIXINTAADA FAFSA WAXAA LOO DIRI DOONAA KULEEKKAAGA

FAFSA-gaaga waxaa lagu sameyn doonaa dib u eegis waxaana warbixin elektarooniga ah loo diri doonaa kuleejka aad ku calaamadeysay FAFSA-gaaga. Warbixintaan waxay xaqiijin doonaa xogta aad ku qortay FAFSA-gaaga waxaana kujiri doonaa Tusmada Kaalmada Ardaygaaga (SAI).

Goorma ayay tahay inaad codsado Gargaarka Dhaqaalaha?

Waqtiyada kama danbeysta ah way kukala duwan yihiin barnaamijyada gargaarka dhaqaalaha. Sababo la xariira xogaha cusub ee 2024-25 FAFSA, xiliga ugu horeeya ee aad soo gudbin karto waa Diseembar 2023.

Sanadaha caadiga ah, marka ugu horeysa ee aad soo gudbin karto codsiga FAFSA ama Xeerka Riyada MN si aad u codsato gargaarka ku saleysan baahida gobolka iyo federaalka wuxuu ahaa Oktoobar 1 deeda sannad dugsiyeedka soo socda.

Xasuusnoow, waa inaad dib u codsato Gargaarka Dhaqaalaha sanad kasta.

WAQTIYADA KAMA DANBEYSTA AH:

- **Deeqaha Gobolka Minnesota:** Dhammaadka sanad tacliineedka (Juun 30)
- **Deeqaha Federaalka Pell:** Dhammaadka sanad tacliineedka (Juun 30)
- **Deeqaha Xarumaha waxbarashada:** Waqtiga kama danbeysta way kaladuwani yihiin, ka hubi dugsigaaga (kuleejyo badan waqtigoodu waa Maarsa 1 ama Abril 1 deeda waqtigooda kama danbeysta ah)
- **Deeqaha waxbarasho ama deeqaha kale:** Waqtiga kama danbeysta way kaladuwani yihiin, ka hubi deeqda waxbarashada

Isbadelada 2024-25 FAFSA

Markii ugu horeysay in ka badan 40 sano, Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayga ee Federalka (FAFSA) wuxuu helayaa dib u qaabayn wayn si loo fududeeyo loona horumariyo habka codsashada gargaarka maaliyadeed. Ma aha oo kaliya in FAFSA la filaayo inay noqoto mid gaaban oo u sahlan ardayda iyo qoysaska si ay u buuxiyaan, foomku wuxuu bixin doonaa balaarinta u-qalmitaanka kaalmada ardayda federaalka, yaraynta caqabadaha ardayda qaarkood wuxuuna bixin doonaa khibrad isticmaal oo wanaagsan.

**FAFSA-da cusub waxay bilaaban doontaa Diisambar 2023,
waxaana dib u dhac ku yimid taariikhda bilowga ah ee Oktoobar 1.
Halkaan waxaad ka helaysaa waxa aad filan karto:**

- AQOONSIGA FSA EE QOF WALBA**

Ardayga (codsadaha) iyo waalidkuba waa inay abuuraan akoonka Gargaarka Ardayga ee Federalka (Aqoonsiga FSA) oo leh magac isticmaale iyo baasaweer. Isticmaalayaasha aan lahayn Lambarka Amniga bulshada waxay abuuri karaan Aqoonsi FSA iyo gelitaanka FAFSA.

- DOORARKA KU SALEYSAN FAFSA**

FAFSA-da dib loo habeeyay waxa ay noqon doontaa qaab door ku salaysan, taasoo la micno ah in qof walba uu awoodi doono inuu arko su'aalaha la xiriira doorkooda. Marka ardaygu galo barta, waxay buuxin doonaan su'aalaha ay tahay inuu ka jawaabo ardaygu. Waalidka ama xaaska ayaa u baahan doonta inay galaan barta si ay u arkaan su'aalaha la xiriira doorkooda. Kadib marka door kasta dhameeyo su'aalahooda, FAFSA waxay awoodi doontaa inay gudbiso

- XOGTA WAREEJINTA MACLUUMAADKA CANSHUURTA FEDERAALKA**

Isticmaalayaashu waa inay oggolaansho siyyaan IRS si ay u bixiso canshuur iyo xogta la xiriirta ee loo adeegsanaayo FAFSA. Talaabadaan waa qasab, walina ma ahan ikhiyaari. Badelka Qalabka Soo Celinta Xogta IRS, isweydaarsiga xogta tooska ah ee IRS wuxuu u oggolaanayaa isticmaaleyaasha macluumaadka canshuurta federaalka in la soo saaro oo si toos ah loogu wareejijo foomka FAFSA. Haddii qofku aanu bixin oggolaanshaha wareejinta macluumaadka canshuurta la xiriirta, ma awoodi doonaan inay helaan gargaarka maaliyadeed ee dawladda dhexe iyo gobolka.

- TUSMADA KAALMADA ARDAYGA EE CUSUB**

Tabarucaadka Qoyska ee La Filaayo (EFC) waxa lagu badeli doona Tusaha Kaalmada Ardayga (SAI) si loo xisaabiyo u-qalmitaanka maalgelinta ku salaysan baahiyaha. SAI waxay noqon kartaa wax yar oo taban sida \$1,500. Qaacizada waxay isticmaashaa arrimo ka yar kuwa EFC, oo u baahan su'aalo ka yar kuwa FAFSA.

- XOG DHEERAAD AH OO KU SAABSAN U QALMIDA DEEQDA PELL**

Si loo go'aamiyo u-qalmitaanka Deeqaha Fedaraalka Pell, SAI, sameynqa qoyska, cabbirka, Dakhliga Guud ee La Hagaajiyay (AGI), iyo Qiimeynqa Saboolnimada Federaalka ayaa la isticmaali doonaa. Haddii ardaygu ka soo baxo shaxda faqriga ee ugu badnaan ama ugu yaraan abaal marinta Pell iyo xisaabaadka SAI, ardayga waxa la siin doonaa lacagta ugu saraysa ee Deeqda Pell oo ay go'aamiyeen labada qaacido ee kala duwan.

**Guud ahaan dhammaan, arrintaas
waa war u wanaagsan ardayda!**

FAFSA-da cusub kaliya kama dhigi doonto u-qalmitaanka gargaarka maaliyadeed mid la saadaalin karo oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaska, waxay keeni doontaa:

- Celceliska Abaalmarinada Deeqaha Pell ee Wayn.
- Korarka tirada ardayda u qalma Pell.
- Abuurista abaalmarinta Pell ee ugu yar.

**XOG MUHIIM AH OO
AY TAHAY IN LALA SOCDA:**

Xasuusnoow, nooca ugu dambeeyaa ee FAFSA-dasub wali lama daabacin. Natijjooyinka muddada faallada furan waxay saameyn ku yeelan kartaa xogaha cusub ee qaar kamid ah isbadelada lasoo jeediyay.

Booqo webseedkeena si aad u hesho xogaha cusub [www.ohe.state.mn.us/
fafschanges](http://www.ohe.state.mn.us/fafschanges)



Isbadelada 2024-25 FAFSA

Tixgelino yaryar oo ay tahay in Isha Lagu hayo

• LA FURAY AMA AY KALA TAGEEN WAALIDIINTEEDA

Ardayga ay waalidiintooda kala tageen ama isfureen ayaa ka warbixin doona maclumaadka ku saabsan "waalidka bixiya qaybta ugu badan ee taageerada dhaqaale ee ardayga." Waalidkaan waa inuu noqdaa kii ardaygu la noolaan in ka badan 12 billood ee la soo dhaafay ama, haddii ardaygu si siman ula noolaaday, kan bixiyay taageerada dhaqaale ee ugu badan 12 billood ee la soo dhaafay. Haddii waalidku dib isku guursado, Qofka aabuhu guursaday sidoo kale waa inuu bixiyaa maclumaadka canshuurta, ilaa lammaanaha is qaba aysan soo gudbin canshuur celin wadajir ah.

• WALAALAHU DHIGTA KULEEKJA

Qoysaska carruurta badan ku leh kuleejyada hadda ma noqon doonaan arrin lagu go'aaminayo u-qalmitaanka gargaarka. Hase yeeshiee, su'aashu waxay kusii ooli doontaa foomka waxayna u baahnaan doontaa in laga jawaabo. Xogtaan waxaa adeegsan kara kuleejyada haddii ay jeelaan lahaayeen inay ku daraan tixgelintooda marka ay abaalmarinta maalgelinta siinayaan machadka.

• GANACSIYADA IYO FOOMAMKA HANTIDA

Ganacsiyada yaryar/beeraha qoyska ayaa looga baahan yahay in loo soo sheego hanti ahaan (hore ganacsiyadii/beeraha qoyska oo ay ka yaraayeen 100 shaqaale ah ayaa laga saaray). Qoysaska leh beeraha iyo ganacsiyada yaryar waa inay isku diyaariyaan inay bixiyaan qiimaha hantida ee la qiyaasay.

XAQIIQOYINKA KALE EE FUDUD

FAFSA ka cusub, marka laga imaado ilaha iyo adeegyada turjumaada, waxaa lagu heli karaa (11) luuqadood ee inta badan looga hadlo Mareykanka.



Ardaydu waxay dooran karaan ilaa 20 kuleej si ay ula wadaagaan FAFSA kooda, ilaa laga bilaabo xadidka 10 kuleej ee hore.

Marka ardaygu bilaabo FAFSA, waalidkood wuxuu haysan doonaa 45 maalmood inay ku buuxiyaan qaybtooda.

Kordhintaa Helitaanka Kaalmada Dhaqaale

- Ardayda aan lahayn guryaha, agoonta ah, dhallintii hore ee korin jirtay, ama ay haystaan duruufo kale oo aan caadi ahayn oo kahor istaagaya inay bixiyaan maclumaadka waalidka waxay ka faa'iidaysan doonaan su'aalo la fududeeyay oo si hufan u go'aaminaya xaaladdooda madaxbannaanida.
- Xadidka u-qalmitaanka kaalmada maaliyadeed iyo su'aalaha la xiriira xukunnada daroogada qaarkood iyo ku guuldaraysiga diiwaangelinta Adeegga Xulashada waa laga saaray.
- Ardayda ku xiran machadyada ciqaabta ee dawlada dhexe ama kuwa gobolka, iyo balanqaadyada kale ee aan ikhiyaarka lahayn, waxay dib u heli doonaan awooda ay ku helayaan Deeqaha Pell

La-taliyaasha iyo Shaqaalahu Kaalmada Dhaqaale

Noqo mid firfiroon oo qorshe hore degsada!

Haddii wax ka badelka lagu sameeyo gudbinta FAFSA ay lagama maarmaan tahay in la waafajiyo ka dib xereynta caadiga ah ee sanad dugsiyeedka 2024-25, hayso qorshe ku saabsan gudbinta waqtiyada kama dambaysta ah ee la cusboonaysiyyay oo ah mudnaanta koowaad. Xaqiji inaad wax ka badesho hawlaha fidinta FAFSA si aad ula jaanqaado isbadel kasta oo ku yimaadda xeraynta kama dambaysta ah.

Eegida Agabyada tababarka ee la xariira xirfadaha waxbarashada? Booqo <https://fsatraining.ed.gov>





U qalmida Gargaarka Ardayga

Arrimo badan ayaa saameyn kara u qalmidaada gargaarka dhaqaalaha.

Xaalada ku tiirsanaanta ama ku tiirsanaan la'aan qof

Dhammaan ardayga waxaa loo arkayaa inay yihii arday ku tiirsan ama aan ku tiirsanayn qof marka ay codsanayaan gargaarka dhaqaalaha. Ardayda waalidiinta ku tiirsan waa inay soo gudbiyaan xogta dhaqaalaha waalidka ee FAFSA. Xogtaan waa muhiim, xataa haddii waalidku uusan dooneyn inuu bixiyo waxbarashada ardayga.



Waxaa si ootamaatiga ah loogu tixgelinayaa inaad tahay arday Aan Qof ku Tiirsanayn sanadka dugsiyedka 2024-25 haddii aad jirto 24 sano ama kasii wayn tahay marka la gaaro Diseembar 31, 2023. Haddii aad ka yar tahay 24 sano, waxaa laguu tixgelin doonaa inaad tahay arday aan qof ku tiirsanayn haddii aad tahay wax kamid ah kuwaan soosocda:

- Haddio aad tahay arday dhameeyay waxbarashada labaad ee jaamacada ama xirfadaha
- Leh Xaas/nin
- Haddii aad haysato carruur ama dadka kale oo kugu tiirsan
- Hadaad ku jirto shaqada waajibaadka militarada
- Hadaad tahay halyeey kasoo shaqeeyay Ciidamada Maraykanka
- Hadaad tahay agoon ama haddii maxkamad ku daryeesho
- Hadaad kujirto xarunta korniinta waqtii kasta, da'da 13 ama kasii wayn
- Kujira daryeel sharci ah ama xaalad yar oo xor ah marka loo eego xogta codsiga (ama dhalashii 18aad haddii aad degan tahay Minnesota)
- Haddii la go'aamiyo inaad tahay qof dhalinyaro ah oo guri la'an ah lana wehlin

Rafcaanada: Haddi aad isleedahay waa in laguu tixgeliyo inaad qof madax banaan duruufo jiro oowgood, kala hadal maamulaha gargaarka maaliyada ee kuleejkaaga wixii ku saabsan "joojinta ku tiirsanaanta". Maamulaha gargaarka wuxuu adeegsan karaa go'aankiisa xirfadeed si uu u badelo heerkaaga ogana dhigo mid madax banaan asagoo ku saleynaaya xaalada qoyskaaga.


Waxyaabaha laga doonaayo Muwaadiniinta

Si ay u dhameystiraan FAFSA, ardaygu waa inuu yahay muwaadin ama qof u qalma oon muwaadin ahayn. Hase yeeshii, Ardayda aan dukumiintiyada haysan ee ku nool Minnesota waxay u qalmi karaan gargaarka dhaqaalaha gobalka ayadoo la raacaato Xeerka Barwaqada Minnesota oo caadi ahaan loo yaqaan Xeerka Riyada Minnesota.



Shaqada Fasalka

Hoos u dhaca iyo kor u kaca tirada buundooyinkaaga halkii teeramba, waxay saameyn ku yeelan karaan gargaarka dhaqaalaha ee u qalanto inaad hesho. Xaafiskaaga gargaarka dhaqaalaha ka hel xog dheeeraad ah.



Wareejinta Dugsiga

Laanta gargaarka dhaqaalaha si ootamaatiga ah ardayda uma wareejiso kuleej kale. Ardaydu waa inay lasoo xiriiraan xafiiska gargaarka maaliyada ee kuleejka cusub si ay u go'aamiyaan tallaabooyinka ay tahay in la qaado si loo helo gargaarka. Ardaydu waa inay xaqijiyaan inay haystaan FAFSA nooca elektatooniga ah ayna u diraan xarunta cusub ee waxbarashada. Gal barta www.fafsa.gov oo ku dar koodhka dugsiga ee machadka cusub si FAFSA sixid ugu sameyso.



Ardayda hela amaaahda tooska ah, Amaahda PLUS ama Amaahda GAARKA AH waxay u baahnaan doonaan inay mar kale soo codsadaan. Ardayda ka qaybgaleysa oggolaanshaha shaqada ama Deeqda Daryeelka Ilmaha Minnesota waxay sidoo kale u baahan doonaan inay mar kale soo codsadaan. Haddii aad u wareegsato dugsi xoogaa qaali ah, waxaad xaq u yeelan kartaa inaad hesho gargaar dheeraad ah. La xiriir xaafiskaaga gargaarka dhaqaalaha si aad u hesho xog.



Heerka Riyada Minnesota



Ilaha loogu talagalay Ardayda aan Sharciga lahayn

Ardayda aan sharciga lahayn oo kasoo baxa shuruudaha Xeerka Riyada MN waxay u qalmaan kharashka waxbarashada tuushinka ee gobalka, gargaarka dhaqaale ee sida gaarka ah loo maalgeliyo oo ay maamulaan kuleejyada dadwaynaha iyo jaamacadaha Minnesota, waxayna codsan karaan gargaarka maaliyada ee uu gobolka bixiyo.

Ardayda gobalka Minnesota ee la siiyay Action Deferred for Childhood Arrivals (DACA, Oggolaanshaha Xeerka Dib u dhigaaya u Celinta Carruurta) ayaa sidoo kale laga yaabaa inay xaq u yeeshaan gunnooyinkaan. Sidoo kale waxaad xog dheeraad ah ka baran kartaa oo ku saabsan Xeerka Riyada MN iyo sida loo codsado gunnooyinkaan www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct

Codsiga Sharciga Riyada MN waa in la soo gudbiyaa hal mar sanad dugsiyed kasta oo ardaygu ku jiro kuleejka.

Kusoo gudbi MNAid - Aalad Aammaan ah oo cusub

Dhawaan la bilaabay oo diyaar u ah sannad dugsiyedka 2023-24, ardayda aan haysan sharciga ayaa hadda codsan doona Xeerka Riyada MN iyada oo loo marayo MNAid, oo ah goob ammaan ah oo ardayda si ay u dhammaystiraan codsigooda kaalmada maaliyadeed. Aalada MNAid waxa ay u ogolaataa isticmaalayaasha inay ka soo galaan Xariirka Ardayga oo ay ku abuurtaan akoon wata isticmaale magac iyo baasaweer.



HEL AQOONSIGA HEERKA RIYADA MINNESOTA EE GAARKA AH

Codsadayaasha aan haysan lambarka Sooshal Sekuurtiga waxaa loo qori doonaa lambarka Aqoonsiga Sharciga Heerka Riyada MN oo gaar ah (oo sidoo kale loo yaqaan Aqoonsiga Codsadaha) si ay u galaan akoonadooda.

CODSADAYAASHII HORE: Horey ma u buuxisay Heerka Riyada MN?

Ardayda horey u buuxiyey codsiga Heerka Riyada MN iyaga oo aan isticmaalin lambarka Sooshal Sekuurtiga (kahor 22-23 sanad dugsiyedka) waa inay isticmaalaan Aqoonsiga Codsadaha, oo uu bixiyo Xafiiska Waxbarashada Sare. Haddii aadan aqoon aqoonsigaaga codsadaha, fadlan nagala soo xariir info.ohe@state.mn.us ama 651-398-6517.

CODSADAYAASHA CUSUB: Ma codsanaysaa Heerka Riyada MN markaagii koowaad?

Codsadayaasha cusub, markii koowaad codsanaya waxay si ootamaatiga ah u heli doonaan aqoonsiga codsadaha ee loogu talagalay marka ay codsadaan.

Barta Ardayga Cusub ee MNAid waxay u oggolaanaysaa codsadayaasha Heerka Riyada MN inay:

- Seyf gareeyaan horumarka oo ku soo celiyan codsiga, ayagoo meesha ka saaraya baahida loo qabo in lagu buuxiyo hal fadhi
- Eegaan xaalada codsiga ee markaas ayna helaan ogeysiisyo
- Eegaan dukumiintiga xaqijintaa ee loo baahan yahay, waa inay si ammaan ah usoo geliyaan una raadraacaan hormarka hubinta
- Helaan taariikhda abaalmarintii hore ayna helaan dukumiintiyada badbaadinta nolasha
- Eegaan u qalmida Deeqaha Gobolka Minnesota ee heer amaah oo kasta
- Helaan natijjooyinka qiimeyn taahiyaha ee federaalka, oo loo isticmaali karo in lagu codsado deeqaha waxbarashada qolyaha saddexaad

Deeqaha Federaalka

Si aad u codsado uguna qalanto deeqda federaalka, waa inaad tahay muwaadin Maraykan ah, qof u dhashay Maraykanka ama qof aan muwaadin ahayn oo u qalma. Guud ahaan, waxaad tahay qof aan ahayn muwaadin oo u galma haddii aad:



- Haysato deganaanshaha rasmiga ah ee Maraykanka oo wata kaarka I-551C;
 - Xaalad jirto oowgeed ku heshay deganaanshaha rasmiga ah ee wata kaarka I-551C;
 - Haysato Diiwaanka Imaanshaha Dalka (I-94) oo aad ka heshay Waaxda Amniga Dalka ayna ku qoran yihin mid kamid ah arrimahaan: qaxooti, oggolaanshaha nabadjelyo doonka, a parolee, soo galootiga Cuban- Hatian, qof la kulmay xadqudubka ka qanacsiga dadka, ama qof haysta fiisa T-Visa.

Haddii aad tahay muwaadin ama qof aan muwaadin ahayn oo u qalma, waxaad u qalmi kartaa deeqaha federaalka xataa haddii waalidiintaadu aysan haysan dukumiintiga sharciga. Marka aad buuxiso FAFSA, waxaad gelin kartaa dhammaan eberada ku yaala lambarada amniga bulshada ee waalidkaa. Haddii aadan u qalmin Xeerka Riyada MN, inta badan kuleejyada iyo jaamacadaha dadwaynaha ee Minnesota waxay bixiyaan waxbarashada gobolka gudhiisa ah waxayna siiyaan dhammaan ardaydooda, ayadoon loo eeqayn xaaladda soogalooyiqa ama xaaladda deganaanshaha ay haystaan.

Deeqaha Waxbarashada

Deeqda waxbarasho waa mid ka mid ah labada nooc ee gargaarka maaliyadeed ee aan u baahnayn in dib loo bixiyo. Waxaa lagu bixiyaa deeqaha waxbarashada ayadoo la raacaayo tacliinta ardayga, ama guusha ciyaaraha fudud, dhaqanka ama aasaaska diinta, ama xirfadaha qaarka ah iyo tavada.



Halkee laga bilaabaa? Mid ka mid ah dariiqa ayaa ah inaad ka hubiso xafiiska kaalmada maaliyadeed ee kuleej kasta oo aad tagi karto. lyadoo machadku uu ku siin karo deeq waxbarasho oo qayb ka ah xidhmada gargaarka maaliyadeed iyada oo aan la helin waraaqo dheeraad ah, waxaad sidoo kale u baahan kartaa inaad raadiso oo aad dalbato deeqo waxbarasho oo gaar ah. Sidoo kale, kuleejyada qaarkood waxay ardayda ka doonayaan inay dhammaystiraan borofaylka CSS, (qiimayn qotodheer oo baahida dhaqaale ku saabsan) ee la xariirta tixgelinta deeqda waxbarasho. Sida caadiga ah, filo kuleejyada inay kaa codsadaan inaad buuxiso FAFSA si loo qo'aamiyo baahidaada dhaqaale.

Qaar kamid ah kuleejyada iyo jaamacadaha waxaa laga yaabaa in laga bixiyo deeqo waxbarasho oo loogu talagalay ardayda ayadoon laga eegeyn xaalada soogalootigooda. La taliyayaal badan oo qaabilsan gargaarka maaliyada ayaa la socda oo u nugul xaaladdaada waxayna isku dayi doonaan inay kuu caawiyaan sida uqu wanaqsan ee macquulka ah.

Ururo badan oo gaar loo leeyahay ayaa oonleenka kusoo daabaca deeqaha waxbarashada.

Xoq badan oo ku saabsan deeqahaan waxbarasho waxaad ka heli kartaa bartaan

www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct



**KA BARO XOG BADAN OO KU SAABSAN
DEEQQAHA WAXBARASHADA MYHIGHERED**
www.myhighered.mn.gov/paying-college/scholarships



Deeqaha Gobolka



Deeqaha Gobolka waxay qoysaska hela dakhliga hoose- iyo kuwa dakhligoodu dhedhexaadka yahay ka bixiyaan kharashaadka waxbarashada ee Kuleejyada ama jaamacadaha u qalma ee kuyaala Minnesota.

Haddii aadan ahayn muwaadin ama qof aan muwaadin ahayn oo u qalma, waxaad u xaq u leedahay inaad codsato deeqda Gobolka MN iyo barnaamijyada gargaarka ee gobolada kale haddii aad kasoo baxdo dhammaan shuruudaha Xeerka Riyada MN:

- Haddii aad dhigatay dugsiga sare ee Minnesota muddo dhan ugu yaraan 3 sanadood;
- Haddii aad ka qalin jabisay dugsiga sare ee Minnesota ama Aadna GED-gaaga ku heshay Minnesota;
- Haddii aad iska diiwaangashan tahay Adeega Militariga (hadaad tahay nin jira 18-25 sano);
- Haddii aad codsaday xaaladda socdaalka sharciga ah marka uu diyaarka yahay nidaamka federaalka ee hawshaan (looma baahna maadaama nidaamka federaalku aanu hadda jirin).

Codsiga dhaqaalahaa gobolka waxaa laga heli karaa: www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct. Haddii kale, ardaydu waa inay yihiin muwaadiniin Maraykan ah ama ay u qalmi karaan ayagoon ahayn muwaadiniin si ay codsadaan Deeqda Gobolka MN ayagoo adeegsanaya Codsiga Gargaarka Federaalka ee Ardayda (FAFSA).

Si aad ugu qalanto deeqda Gobolka MN, codsiga waa in la soo gudbiyaa kahor dhamaadka sanad dugsiyeedka (Juun 30-keeda). Natijjooyinka codsiga sidoo kale waxaa loo isticmaali karaa si loogu qalmo kharashka qiimaha waxbarashada gobolka iyo kaalmada maaliyadeed ee gobolka.

MA OGTAHAY?

Inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2022, 55% ardayda hela Deeqda Gobolka waxay kasoo jeedaan qoys dakhli ahaan hela wax ka yar \$40,000.



Amaahda SELF (SELF Loan)




Minnesota waxay bixisaan barnaamij amaah ah oo lagu magacaabo Amaahda SELF, kaas oo ay heli karaan ardayda iyada oo aan loo eegin heerka socdaalka. Codsi gaar ah ayaa loo isticmaalaa in lagu codsado Amaahda SELF, oo laga heli karo xafiiska kaalmada maaliyadeed ee kuleejka. Wax ka saxiiyashaamaahda SELF waa inay si rasmi ah u degan yihiin ama yihiin muwaadin Maraykan ah.

Siyasadaha Tuushinka

Ardayda kasoo baxa shuruudaha Xeerka Riyada MN waxay u qalmaan kharashka waxbarashada tuushinka ee laga bixiyo kuleejtada iyo jaamacadaha dadwayaha Minnesota. Kuleejkaaga ama jaamacadaada waxay ku tusin kartaa dukumiintiyo muujinaaya inaad kasoo baxday shuruudaha.

U firso Kharashaadka Waxbarashada Sare



Mid ka mid ah siyaabaha ugu waxtarka badan ee hoos loogu dhigi karo qiiimaha helitaanka shahaadada tacliinta sare waa inaad hesho buundooyinka kuleejka inta aad weli ku jirto dugsiga sare. Inta badan barnaamijyadaan waa lacag la'aan, laakiin dhammaan barnaamijyada lagama helo dhammaan dugsiyada. Ka qaybqaadashadu waxay sidoo kale u baahan kartaa heer aqooneed oo gaar ah. Waydiiso lataliyahaaga dugsiga sare.

Postsecondary Enrollment Options (PSEO, Ikhiyaarada Diiwaangelinta Dugsiga Sare kadib) waxay u ogolaanayaan ardayda fasalada 10 ilaa 12 aad inay ku qaataan koorsooyinka kuleejka Minnesota, jaamacada, ama interneetka. Ardaydu waxay tagaan fasalka waxayna dhammadystiraan isla hawlihii looga baahnaa ardayda kuleejka caadiga ah. Lacagaha gobolka ayaa daboolaya kharashka waxbarashada, buugaagta iyo khidmadaha shaybaarka. Ardaydu waxay helaan buundooyinka dugsiga sare iyo kuleejka si ay qaab guul leh ugu dhammadystiraan koorsooyinka.

Lacagaha gaadiidka ayaa diyaar u ah si loogu caawiyo ardayda ka soo jeeda qoysaska danyarta ah si ay u aadaan xerada koorsada PSEO. Sharcigu wuxuu leeyahay dugsiyadu waa inay u ogolaadaan ardayda inay isticmaalaan kumbuyutarkooda iyo Wi-Fi si ay u qaataan koorsooyinka ka qaybqaadashada PSEO ma mamnuucayso ardayga dugsiga sare inuu ka qaybqaato hawlahu uu dugsigu kafaalo qaado. Kuleejka Hore/Dhexe Qaybta PSEO waxay u ogolaataa qaar badan oo aan buuxin shuruudaha oggolaanshaha caadiga ah inay ka qaybqaataan. Xog badan ka baro www.ohe.state.mn.us/sPages/collegeCreditHS.cfm

Barnaamijyada xagaaga waxaa bixiya kuleejyada qaar kamid ah waxayna u ogolaadaan ardayda dugsiga sare ee xaqaa u leh inay ku helaan buundooyinka kuleejka iyadoo loo marayo waxbarashada xerada xagaaga.

Ardaydu waa inay kala hadlaan la-taliyaha dugsiga sare xiisahooda koorsooyinka PSEO iyo shuruudaha wali loo baahan yahay si ay oga qalin jabiyan dugsiga. Sharciga PSEO wuxuu dhigayaa in ardaydu ogeysiyaan degmadooda ama dugsiga charter inay rabaan inay iska qoraan koorsooyinka PSEO May 30 ee sannad dugsiyeedka soo socda.

Advanced Placement (AP, Meelaynta Balaaran) waxaa bixiya dugsiyo badan. Kuwaan waa koorsooyin heer jaamacadeed ah sida Ingiriis, taariikh, bini'aadminimo, luuqadaha, xisaabta, cilmi nafsiga, iyo sayniska iyo in kale oo badan. Fasalo ayaa lagu baraa wax dugsigaaga sare. Waxaad heli kartaa dhibcaha dugsiga haddii aad buundo badan ka hesho imtixaanka. Waa u bilaash ardayda dakhliga hoose ee kunool Minnesota.

Concurrent Enrollment (CE, Is-diiwaangelinta isku xigta) waxaa badanaa loogu wacaa "Kuleejka Dugsiyada (CIS)". CE waxay bixisaa koorsooyin heer kuleej ah oo lagu dhigto dugsigaaga sare iyadoo la kaashanaysa dugsiyada sare iyo kuleejyada iyo jaamacadaha deegaanka. Koorsooynkaas waa u bilaash ardayda. Ardaydu waxay helaan buundooyinka dugsiga sare iyo kuleejka si ay qaab guul leh ugu dhammadystiraan koorsada. Waxaa ardayda bari kara macalimiin u qalma dugsiga sare, macalimiin, ama koox wax barta labadaba.

Ururka International Baccalaureate (IB) waa barnaamij laba sano ah oo ka horeeya kuleejka oo laga bixiyo dugsiyada sare qaar kamid ah. Waxa jira lix qaybood oo maado (luuqadaada aasaasiga ah, luqadaada labaad, xisaabta, cilmiiga tijaabada ah, farshaxanka iyo bani-aadmiga) oo ardaydu baran karaan si ay suurtagal ugu noqoto inay kasbadaan buundooyinka kuleejka. Waa inaad ku baasto imtixaanka la xariira lacag ee lagu helo dhibcaha.



Ururka Project Lead the Way (PLTW) waa bixiye bixiya barnaamijyada sayniska, farsamada, injineernimada, iyo xisaabta (STEM) iyadoo la adeegsanayo qaabdhismeed dhexdhexaadin ah. Khibradaan waxay u baahan tahay in ardaydu bartaan imtixaan ku salaysan lacag. Dhammaan kuleejyada ma aqbalaan dhibcaha PLTW.

College-Level Examination Program (CLEP, Barnaamijka Imtixaanka Heerka Kuleejka) wuxuu siyyaa ardayda fursad ay ku helaan buundada kuleejka ayadoo lagu saleynaayo waxay horey u yaqaaneen. Imtixaanada CLEP-ga waxa ka mid ah dadka waaweyn ee hadda soo galaya ama ku noqonaya dugsiga, xubnaha adeegga milatariga, ardayda dugsiga sare ee hadda dhigta, iyo ardayda kuleejyada dhaqanka. Imtixaanka CLEP waa imtixaan ku saabdan kharashka dugsiga oo lagu dhigto maadooyin kaladuwani.

Barnaamijka Labada Luuqadood ee Minnesota wuxuu u ogolaadaa ardayda inay helaan buundooyinka kuleejka bilaashka ah iyagoo muujinaya heerka sare ee luuqada aduunka, oo ay ku jiraan luuqada dhagoolayaasha Mareykanka (ASL) iyo luuqadaha Hindida Maraykanka ee asaliga ah. Kuleejyada iyo Jaamacadaha Gobolka Minnesota waxay ku abaalmariyaan buundada kuleejka ardayda gala imtixaankan fasallada 10, 11, ama 12 aad. Laguma talinaayo in lagu qaato qiimeynta fasalka 9aad haddii hadafku yahay in la helo buundada kuleejka.



Isdiiwaangelinta Tooska ah ee Minnesota

Barnaamij gobol cusub oo loogu talagalay in lagu hormariyo helitaanka waxbarashada sare, Oggolaanshaha tooska ah ee Minnesota waxa laga heli karaa dugsiyada sare ee Minnesota ee ka qayb galaya sannad dugsiyeedka 2023-24.

Caqidada asaasiga ah ee ka danbeysa Oggolaanshaha Tooska ah waa in dhammaan ardaydu yihiin "ilaha kuleejka." Dadka waawayn ee qalin-jabiya si firfircoona ayaa loo ogeysiyyaa kuleejyada iyo jaamacadaha badan ee lammaanaha ah kuwaas oo u heellan inay galaan iyaga oo ku saleysan diiwaankooda tacliineed iyo taariikhda qalin-jabinta ee la saadaaliyay.

Horaanta sanad dugsiyeedka, dadka waawayn waxay heli doonaan xiriir gaar ah oo ku qoran dhammaan dadka ka qaybgalaya kuleejyada Minnesota iyo jaamacadaha ay ka diiwaangashan yihiin. Ardaydu waa inay markaa buuxiyaan codsiga gelitaanka bilaashka ah mid kasta oo ka mid ah kuleejyada iyo jaamacadaha ay xiiseynayaan inay dhigtaan. Dhammaan kuleejyada iyo jaamacadaha ka qaybgalaya waxay ka tanaasulaan khidmada codsigooda taasoo qayb ka ah oggolaanshaha tooska ah.

Xog badan ka baro hindisahaan oo arag dugsiyada sare ee Minnesota ee hadda ka qaybgalaya iyo machadyada www.ohe.state.mn.us/directadmissions.



LOOGU TALAGALAY WAALIDIINTA



Majiraan Gunnooyin Canshuur oo la xariira Waxbarashada?

Haa! Waxaa la heli karaa dookhyo iyo kayd canshuur oo la doorbidaayo si ay kaaga caawiyaan inaad sameyso kayd aadna iska bixiso waxbarashada dugsiga sare kadib. Arrimahaan waxay si gaar ah qiimo u yeelanayaan haddii qoysku bilaabo inuu adeegsada markay carruurtu yar yihiin.

Xogtaan soosocota looma tixgelin doono loomana tixgelin karo canshuur ama talo maalgelin. Lifaaga xogta dheeraadka ah iyo/ama macluumaadka xiriirka taleefanka ayaa raacaya mid kasta oo kamid ah xulashooyinka lasoo jeediyay. Qaar kamid ah dookhyada gunnooyinka ee la heli karo waxay saameyn ku yeelan karaan dookhyada kale. Sidaas oowgeed, Xaafiska Waxbarashada Guud (OHE) wuxuu si adag kuugu dhiirigelinayaa inaad u gudbiso su'aalo gaar ah oo ku saabsan xaaladdaada maaliyadeed xirfadle ku takhasusay cashuuraha ama arrimaha maalgashiga.

DHEEFAHA

- Fursada Dhibcaha Canshuurta Mareykanka:** Sannad canshuureedkii 2022, waxa laga yaabaa in aad ka dalbatay canshuur celintaada federaalka ilaa \$2,500 arday kasta oo u qalma.
- Dhibcaha Canshuurta ee Barashada Nolasha:** Sannad cashuureedkii 2022, waxa laga yaabaa inaad awooday inaad dalbato dhibco dhan \$2,000 oo ah kharashka waxbarashada u qalma iyo kharashyada la xiriira cashuur celinta kasta.
- Jarista Dultaarka amaahda ardayga:** Waxaa laga yaabaa inaad ka jarto dultaarka amaahda ardayga naftaada, xaaskaaga ama dadka kale ee kugu tiirsan. Waxbarashada ugu badan kama badan karto \$2,500 sanadkiiba canshuur celintaada federaalka.
- Caawinta Waxbarashada ee uu Loo-shaqeeyaha Bixiyo:** Loo shaqeeyaasha qaar kamid ah waxay bixiyaan faa'iidooyin caawimaad waxbarasho oo ay ku jiraan bixinta amaahda waxbarasho ee aqoonta loo qalmo. Arday ka ahaan, waxa laga yaabaa in aad hesho ilaa \$5,250 oo ah canshuurta dheefaha waxbarashada oo lacag la'an ah ood ka hesho cida aad u shaqeynayo sanad kasta. Guud ahaan, waa inaad canshuur ka bixisa cadad kasta oo faa'iido waxbarasho ah oo aad ka hesho cidda aad u shaqeyneyso oo ka badan \$5,250 sanadkii.

Qorshaha Kaydka Kuleejka Minnesota

Qorshaha Kaydka Kuleejka Minnesota waa barnaamijka waxbarashada heerka sare ee Minnesota's 529. Inta badan gobaladu waxay bixiyaan ugu yaraan mid kamid ah qorshayaashaan lagu abuuray Qaybta 529 ee Xeerka Dakhliga Gudaha.



Qorshaha Minnesota waxa uu bixiyaa xulashooyin maalgashi oo kaladuwani kuwaas oo ku kaladuwani heerka khatarta illaa heerka habboonaan la'aanta iyo waliba xulasho si toos ah wax oga badelaya heerka khatarta ayada oo ku saleysan marka ka faa'iidaystaha la filaayo inuu iska diiwaangeliyo shaqada dugsiga sare kadib.

Dakhliga laga helo lacagaha lagu maalgeliyay qorshaha 529 aad waxay keenaan cashuur la'an. Haddii qofka iska leh akoontada uu isticmaalo maalgelinta qorshaha 529 aad si uu ugu bixiyo kharashaadka waxbarashada sare ee uu u qalmo qofka akoonka iska leh, qaybta dakhliga ee miisaaniyada guud ahaan waxay noqon doontaa cashuur la'an (marka laga reebo cashuuraha gobolka Minnesota ee soosocda). Booqo www.mnsaves.org si aad u hesho xog dheeraad ah.

Fiilo gaar ah: Sharciga canshuur dhimista iyo shaqada federaalka ee soobaxay 2017 wuxuu balaariyay qeexitanaka federaalka ee "kharashyada ku baxa tacliinta sare ee tayada leh" si loogu daro illaa \$10,000 sanadkii kharashyada waxbarashada xanaanada-12. Hase yeeshi, gobolka Minnesota wuxuu doonayaa in la bixiyo cashuurta dakhliga gobolka ee qaybta dakhliga ee 529 aad ee miisaaniyada qorshaha ee loo adeegsado in lagu bixiyo kharashka waxbarashada xanaanada-12.

Sharciga qoondada dheeraadka ah ee federaalka, 2020 oo la saxxiyax Duseembare 2019 kii aaya wax looga badeloy qaybta 529 aad ee Xeerka Dakhliga Gudaha si loogu daro laba isticmaale oo cusub qorshaha 529 aad ee miisaaniyada. Dadka koontada hadda haysta waxay isticmaalo qorshaha 529 aad ee miisaaniyad si ay ugu bixiyaan qaar kamid ah kharashyada tabbarka ee diiwaangashan iyo sidoo kale inay dib ugu bixiyaan amaahda ardayda u qalma waxbarashada (iyo marxaladaha quarkood, Amaahda ardayga ee walaalaha ka faa'iidesanyaaya). Fadlan la tasho qorshahaaga 529 aad iyo/ama latoliiy canshuur si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Koontada Kaydka Damaanada Waxbarashada

Lacagta la bixinaayo lagama jaraayo canshuurta, laakiin waxa laga yaabaa in laga saaro dhammaan ama qayb kamid ah lacagta dulsarka lagu helay taxanaha EE ee dakhliga marka aad soo furto damaanada si aad u bixiso waxbarashada dugsiya sare kadib iyo kharashaadka waxbarashada koowaad ee jaamacada iyo waxbarashada labaad ee jaamacada.

Kaydka damaanada Mareykanka ee u qalma waa damaanad EE taxane ah oo lasoo saaray Janaayo 1, 1990 ama kadib ama taxane l damaanad ah. Waxaa jira xadidaad dakhli iyo xadidaad heerka buuxinta canshuurta, oo saameeya gunnooyinka. Kharashaadka u qalmida kuma jiraan kuwa qolka iyo cuntooyinka.

Lacag kala bixida IRAs

Cashuur bixiyayaashu waxaa laga yaabaa inay awoodaan inay bixi karaan akoonada dhaqamada ama kan hawlgabka shahsiga ah ee Roth (IRA) si ay u bixiyaan kharashaadka waxbarashada sare ayagoo aan bixin boqolkiiba tobantashu lacag bixin hore ee khusaysa lacag la bixida kahor inta aanu mulkiiluhu gaarin da' da 59 1/2.

Kharashaadka waxbarashada sare kaliya kama mid ahan kharashka tuushinka iyo lacaga dugsiya, laakiin haddii ardayda la diiwaangeliyo ugu yaraan maalin barkeed, waxaa sidoo kale kujiraaya qolka iyo cuntooyinka.



Waxbarashada Dheefaha Canshuurta: Waxaa la daabacay 970

Waxaa horumariyay Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS), Daabacaada 970 waxay sharaxysaa xadka dakhliga, shuruudaha u-qalmitaanka, kharashyada u qalma iyo sida loo helo dheefaha. Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto dheefaha mid ama in ka badan barnamijyada, laakiin uma qalmi kartid dhammaantood. Qaar badan oo kamid ah barnamijyada waxay leeyihiin xadid dakhli.

Maxaa ka cusub diyaarinta canshuur celinta 2022?

Jarista Dulsarka amaahda ardayga. Sannadkii 2022, cadadka dulsarka amaahda ardaygaaga ayaa si tartiib-tartiib ah loo dhimay (laga saaray) haddii dakhligaga guud ee la isku hagaajiyay (MAGI) uu u dhixeyey \$70,000 iyo \$85,000 (\$145,000 iyo \$175,000 haddii aad soo gudbisay canshuur celin wadajirka ah).

Koontada Kaydka Barnamija Waxbarashada. Sannadkii 2022, cadadka kaydka dulsarka waxbarashadaada waxaa si aayar ah looga saaray (laga saaray) haddii dakhligaga guud ee la isku hagaajiyay MAGI uu u dhixeyey \$85,800 iyo \$100,800 (\$128,650 iyo \$158,650 haddii aad soo gudbisay canshuur celin wadajirka ah).

Jaritaanada ganacsiga iyo waxbarashada shaqada la xariirta. Guud ahaan, haddii aad dalbato dhimista ganacsiga waxbarashada shaqada la xiriirta oo aad baabuurkaaga wadato dugsiya kana soo baxdo, cadadka aad ka jari karto maylka aad martay laga bilaabo Janaayo 1, 2022, illaa Juun 30, 2022, waa 58.5 senti halkii maylba. Cadadka aad ka jari karto maylasha aad waday gaariga laga bilaabo Luulyo 1, 2022, illaa Diseembar 31, 2022, waa 62.5 senti halkii maylba.

Xog dheeraad ah oo ku saabsan Ka bixida IRAs, faa'idada waxbarashada canshuurta iyo dookhyada kaydka waxaa laga heli karaa Daabacaada IRS ee 970 oo laga heli karo www.irs.gov/Pub970





www.ohe.state.mn.us

www.myhighered.mn.gov



1450 Energy Park Drive, Suite 350

Saint Paul, MN 55108-5227

Taleefoonka: (651) 642-0567

Lambarka Bilaashka ah: (800) 627-3529

Fakiska: (651) 642-0675

limaylka: info.ohe@state.mn.us

© 2023 Minnesota Office of Higher Education